*Buuggyarahaaga Health Home*

# Ee Gobolka Washington

*... ee loogu talogalay nolol wanaagsan!*



Adeegaha iskuduwida daryeelka Health Home ee loogu talogalay dadka u qalma

Washington State Department of Social & Health Services
*Transforming lives*

Washington State Health Care Authority

Washington State
Health Care Authority

[English] Language assistance services, including interpreters and translation of printed materials, are available free of charge. Call 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Amharic] የቋንቋ እገዛ አገልግሎት፣ አስተርጓሚ እና የሰነዶችን ትርጉም ጨምሮ በነጻ ይገኛል። 1-877-501-2233 (TRS: 711) ይደውሉ።

[Arabic] خدمات المساعدة في اللغات، بما في ذلك المترجمين الفوريين وترجمة المواد المطبوعة، متوفرة مجاناً، اتصل على رقم 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Burmese] ဘာသာပြန်ဆိုသူများနှင့် ထုတ်ပြန်ထားသည့် စာရွက်စာတမ်းများဘာသာပြန်ခြင်းအပါအဝင် ဘာသာစကားအထောက်အကူဝန်ဆောင်မှုများကို အခမဲ့ရနိုင်ပါသည်။ 1-877-501-2233 (TRS: 711) ကိုဖုန်းခေါ်ဆိုပါ။

[Cambodian] សេវាជំនួយភាសា រួមមានទាំងអ្នកបកប្រែផ្ទាល់មាត់ និង ការបកប្រែឯកសារបោះពុម្ព គឺអាចរកបានដោយឥតគិតថ្លៃ។ ហៅទូរស័ព្ទទៅលេខ 1-877-501-2233 (TRS: 711)។

[Chinese] 免费提供语言协助服务，包括口译员和印制资料翻译。请致电 1-877-501-2233 (TRS: 711)。

[Korean] 통역 서비스와 인쇄 자료 번역을 포함한 언어 지원 서비스를 무료로 이용하실 수 있습니다. 1-877-501-2233 (TRS: 711)번으로 전화하십시오.

[Laotian] ການບໍລິການດ້ານພາສາ, ລວມທັງນາຍແປພາສາ ແລະ ການແປເອກສານຕີພິມ, ມີໄວ້ໃຫ້ຟຣີໂດຍບໍ່ຄິດຄ່າ. ໂທຫາເລກ 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Oromo] Tajajilli gargaarsa afaanii, nama afaan hiikuu fi ragaalee maxxanfaman hiikuun, kaffaltii malee ni argattu. 1-877-501-2233 (TRS: 711) irratti bilbilaa.

[Persian] خدمات کمک زبانی، از جمله مترجم شفاهی و ترجمه اسناد و مدارک (مطالب) چاپی، بصورت رایگان ارائه خواهد شد.با شماره 1-877-501-2233 (TRS: 711) تماس بگیرید.

[Punjabi] ਭਾਸ਼ਾ ਸਹਾਇਤਾ ਸੇਵਾਵਾਂ—ਦੁਭਾਸ਼ੀਏ ਅਤੇ ਪ੍ਰਿੰਟ ਕੀਤੀ ਹੋਈ ਸਮੱਗਰੀ ਦੇ ਅੰਨੁਵਾਦ ਸਮੇਤ—ਮੁਫ਼ਤ ਉਪਲੱਬਧ ਹਨ। 1-877-501-2233 (TRS: 711) 'ਤੇ ਕਾਲ ਕਰੋ।

[Romanian] Serviciile de asistență lingvistică, inclusiv cele de interpretariat și de traducere a materialelor imprimate, sunt disponibile gratuit. Apelați 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Russian] Языковая поддержка, в том числе услуги переводчиков и перевод печатных материалов, доступна бесплатно. Позвоните по номеру 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Somali] Adeego caawimaad luuqada ah, ay ku jirto turjubaano afka ah iyo turjumid lagu sameeyo waraaqaha la daabaco, ayaa lagu helayaa lacag la'aan. Wac 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Spanish] Hay servicios de asistencia con idiomas, incluyendo intérpretes y traducción de materiales impresos, disponibles sin costo. Llame al 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Swahili] Huduma za msaada wa lugha, ikiwa ni pamoja na wakalimani na tafsiri ya nyaraka zilizochapishwa, zinapatikana bure bila ya malipo. Piga 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Tagalog] Mga serbisyong tulong sa wika, kabilang ang mga tagapagsalin at pagsasalin ng nakalimbag na mga kagamitan, ay magagamit ng walang bayad. Tumawag sa 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Tigrigna] ተርጎምትን ናይ ዝተፅሓፉ ማተርያላት ትርጉምን ሓዊሱ ናይ ቋንቋ ሓገዝ ግልጋሎት፤ ብዘይ ምንም ክፍሊት ይርከቡ። ብ 1-877-501-2233 (TRS: 711) ደውሉ።

[Ukrainian] Мовна підтримка, у тому числі послуги перекладачів та переклад друкованих матеріалів, доступна безкоштовно. Зателефонуйте за номером 1-877-501-2233 (TRS: 711).

[Vietnamese] Các dịch vụ trợ giúp ngôn ngữ, bao gồm thông dịch viên và bản dịch tài liệu in, hiện có miễn phí. Gọi 1-877-501-2233 (TRS: 711).

# Buuggyarahaaga Health Home Ee Gobolka Washington

## Maxaa laga wadaa Health Home?

Health Home ma ahan meel; waa nidaam iskuduwid adeego daryeel. Adeegahaana waxaa bixiya iskuduwe daryeel midkaas oo kugu caawin doona in aad sida ugu fiican uga faa'ideysatid adeegaha iyo taageerooyinka aad hadda qaadatid.

Adeegaha Health Home waxaa loogu talogalay in ay kugu caawiyaan xaaladahaaga xanuunka daba dheeraaday iyo in aad la kulantid oo aad gaartid ujeeddooyinka caafimaadka aad dooratid. Adeegaha Health Home waxay wanaajinayaan iskuduwida dhammaan baahooyinka adeega bulshada iyo caafimaadka, sida adeegaha muddada-dheer iyo taageerooyinka, iyo caafimaadka hab dhaqanka ay kujiraan xanuunada isticmaalka daroogada. Barnaamijka Health Home waxaa loogu talogalay in uu kordhiyo helida iyo iskuduwida daryeelkaaga.



## Maxay yihiin adeegaha Health Home sideena kuu caawin karaan?

- Maarayn daryeel buuxa oo ay kujirto horumarinta ama samaynta Qorshaha Tallaabada Caafimaadka shakhsiyeed oona leh ujeeddooyin iyo tallaabado lagu gaaro ahdaaftaasi.
- Iskuduwida daryeelka wuxuu kugu caawinayaa in aad wanaajisid xiriirka aad la leedahay adeeg bixiyayaashaada, qoyskaaga, iyo daryeel bixiyayaasha kale.
- Qorshaha guurista ama wareegida wuxuu ku caawinayaa marka aad ka baxdid isbitaalka ama xarunta daryeelka.
- Adeegaha taageerada qoyska iyo qofka waxay aqoonsanayaan doorarka xubnaha qoyska, taageerooyinka aan rasmiga ahayn, iyo daryeel bixiyayaasha si ay kuugu caawiyaan in aad gaartid ujeeddooyinkaaga caafimaad.
- Wareejinta laguu wareejiyo adeegaha taageerada bulshada iyo jaaliyada waxay kugu caawiyaan waxyaabaha sida gaadiidka, cuntada, iyo guryaynta.
- Kobcinta caafimaadka waxay bixisaa tababar waxbarasho iyo ficnaansho si laguugu caawiyo in aad gaartid ujeeddooyinkaaga caafimaad.

## Qofkee u qalma adeegaha Health Home?

Waxaad u heshay Buuggyarahaan Health Home sababtoo ah adiga waxaad tahay qof u qalma barnaamijka. Adeegaha waxaa loogu talogalay dadka da' kasta oo ay yihiin la nool ugu yaraan hal xaalad xanuun daba dheeraaday oo xadidan. Qaar kamid ah xaaladaha caafimaadka xanuunka daba dheeraaday ee ka dhigaya qofka in uu noqdo mid u qalma waxaa kamid ah:

- Kansar
- Xaalado daba dheeraaday oo neefsashada ah
- Cudurka caqli suulida ama Alzheimer
- Sonkoroow
- Cudurka kudhaca nidaamka dheefshiidka
- Cudurka wadnaha
- Naafonimo wax garadka ah ama cudur
- Xaalad caafimaadka hab dhaqanka ah
- Xaalado muruqyaha ah
- Cudur neerfaha ah

## Maxaa laga wadaa iskuduwaha daryeelka Health Home?

Iskuduwaha Health Home waa qof kugu caawinaya in aad kaqayb qaadatid barnaamijka Health Home. Iskuduwahaaga daryeelka caafimaadka wuxuu kugula shaqayn doonaa in aad qaadatid daryeelka saxda ah, ee aad ka qaadatid bixiyaha saxda ah, oona qaadatid wakhtiga saxda iyo meesha saxda ah.

Iskuduwahaaga daryeelka wuu kula soo xiriiri doonaa si uu kuugu sharxo adeegaha iskuduwida daryeelka kaagana jawaabo su'aalaha aad qabto ee kusaabsan barnaamijka Health Home.

## Sideed ku helaysaa adeegaha Health Home?

Waxaa jira seddex tallaabo aasaasi ah oo aad ugu biiri karto barnaamijka Health Home:

**1. In laguu qoondeeyo Health Home:** Marka aad noqotid qof u qalma, waxaa laguugu xiri doonaa ururka madaxa ka ah Health Home, midkaas oo u qoondeyn doono iskuduwe adiga kula soo xiriiraya. Iskuduwaha daryeelka wuxuu kaaga jawaabi doonaa su'aalahaaga adigana waxaad go'aansan kartaa haddii aad kaqayb qaadanaysid barnaamijka Health Home iyo haddii aadan kaqayb galaynin.

**2. Buuxisid Foomka Oggolaanshaha iyo *Wadaagista Macluumaadka*:** Iskuduwaha daryeelka wuxuu kugu caawin doonaa in aad buuxisid foomka oggolaanshaha adeegaha Health Home si aad u oggolaatid wadaagista macluumaadkaaga adeega iyo bulshada iyo caafimaadka. Macluumaadka kaliya waxaa lala wadaagi doonaa daryeel bixiyayaasha iyo kuwo kale oo aad dooratid.

**3. Buuxisid Qorshaha Tallaabada Caafimaadka:** Waxaad awoodi doontaa in aad dooratid ujeeddooyinkaaga caafimaad, kuwaas oo iskuduwahaaga daryeelka ku dari doono Qorshahaaga Tallaabada Caafimaadka. Midaana waxaa loo isticmaali doonaa in ay idin ku caawiso adiga iyo iskuduwahaaga in aad oggaatiin haddii aad u baahantihiin adeego dheeraad ah iyo ilo, sida:

- Baahooyinkaaga
- Adeegaha muddada dheer iyo taageerooyinka
- Adeegaha caafimaadka hab dhaqanka
- Xogaga Bulshada
  - Guriyaynta
  - Gaadiid raaca

Waxaad codsan kartaa oona habbayn kartaa booqashooyin mustaqbalka ah oo wakhti kasta ah, oona ka dhaca meesha aad adigu dooratid.

## Ma ku jiraysaa mana helaysaa daryeelkaaga caafimaadka hadda ah iyo daryeel bixiyayaasha kale?

Haa, adeegahaaga hadda ah iyo daryeel bixiyayaashaada waxay ahaanayaan sidooda. Sida qayb kamid ah adeegaha Health Home, iskuduwahaaga daryeelka wuxuu kala xiriiri karaa daryeel bixiyayaasha waxa kusaabsan caymis kujirida la iskuduway iyo wareejinada daryeelka intiiba ay isbedelayaan baahooyinkaaga.

## Sidee daryeel bixiyayaasha ku oggaanayaan haddii aad ku jirtid barnaamijka Health Home iyo qofka lala xiriirayo?

Waxay kuu sheegi doonaan in aad ka oggaatid ProviderOne, ama in aad kala xiriirtid Maamulka Daryeelka Caafimaadka lambarkan 1-800-562-3022.

## Ma waxay tahay in aad lacag ku bixisid adeegaha Health Home?

Maya, adeegahaan waa kuwo lacag la'aan kuu ah adiga.

## Maxaad samaynaysaa haddii aadan ku faraxsanayn iskuduwaha daryeelkaaga?

Waxaad la xiriiri kartaa ururkaaga iskuduwida daryeelka Health Home si aad uga codsatid iskuduwe daryeel kale.

## Maxaad samaynaysaa haddii aad u guurtid meel kale oo gobolka kamid ah?

Waxaa laguu qoondayn karaa iskuduwe daryeel cusub. Waxaa laguula soo xiriiri karaa si laguugu sheego waxa kusaabsan adeegaha socda.

## Maxaad samaynaysaa haddii aad waysid Apple Health (Medicaid) ama caymis kujirida Medicare?

Haddii aad waysid u qalmitaanka Apple Health (Medicaid), uma qalmaysid oo waad waynaysaa adeegaha Health Home.

Haddii aad waysid u qalmitaankaaga Medicare oo aadan waayin u qalmitaanka Apple Health, weli waxaad u qalmi kartaa in aad qaadatid adeegaha Health Home.

## Maxay yihiin xuquuqahaaga cabashada iyo rafcaanka?

Waxaad haysanaysaa cabashadaada Medicare iyo Apple Health ee hadda ah iyo xuquuqahaaga rafcaanka.

## Maxaad samaynaysaa haddii aadan doonaynin in aad kaqayb qaadatid barnaamijka Health Home?

Waxaad la hadli kartaa iskuduwahaaga daryeelka Health Home waxaadna ka codsan kartaa in lagaa saaro barnaamijka. Hadhow haddii aad bedesho ra'iyigaaga, waxaad ka wici kartaa Maamulka Daryeelka Caafimaadka lambarkan 1-800-562-3022 waxaadna ka codsan kartaa in dib-laguugu qoro barnaamijka Health Home.

## Loogu talogalay Hindida Maraykanka ah ama Dadka asal ahaan u dhashay

Hindida Maraykanka u qalma iyo Dadka asal ahaan u dhashay waxay dooran karaan in ay kaqayb galaan Health Home wakhti kasta ayaga oo lasoo xiriira Maamulka Daryeelka Caafimaadka, midkaas oo xaqiijin doona u qalmitaanka kuna caawin doona isqorida.



Qofkee la wacayaa haddii ay dhacaan

**dhibaatooyin caafimaad**

Loogu talogalay xaalad deg-deg ah oo halis gelisa nolosha,

# wac 911.

## Gudaha bogga internetka

Si aad u oggaatid macluumaad baddan oo kusaabsan barnaamijka Health Home, gal boggaan internetka **hca.wa.gov/free-or-low-cost-health-care/apple-health-medicaid-coverage/health-home**.

Maamulka Daryeelka Caafimaadka wuxuu ballan ku maray in uu bixiyo gelid ama helid loo simanyahay oo lagu galo ama lagu helo adeegaheena. Haddii aad u baahantahay guri diyaafadin, ama dukumeentiyo qaab kale u qoran, fadlan wac 1-800-562-3022. Dadka qabba naafonimo maqalka ama dhagaysiga ah fadlan soo waca 711 si aad u heshiin adeegaha gudbinta ama lasocoshada.

Washington State Health Care Authority
P.O. Box 45535
Olympia, WA 98504-5535
HCA 22-851 SM (6/21) Somali